



1437 Bannock St.  
Denver, CO 80202  
p: 720.865.7695  
[JIC\\_news@denvergov.org](mailto:JIC_news@denvergov.org)

WAR SAXAAFADEED  
Shaacin Degdeg ah  
Abril 23, 2020

Denver waxay Bixinaysaa Tilmaan Ku aadan Adeegsiga Jardiinada inta Lagu Jiro Amarka Joogista Guriga

**DENVER** – Ayadoo dhammaadka asbuucu soo dhawyahay, waxaan idin xasuusinaynaa in inta badan beeraha raxada ee Denver furan yihiin si loo taageero caafimaadka iyo fayaqabka dadka deegaanka laakiin waxaa lasoo kordhiyay tilmaamo iyo xanibaado cusub.

Denver Parks & Recreation (Waaxda Beeraha Raaxada iyo Nasiinada ee Denver) waxay soo saartay tilmaan ku meel gaar ah si loo mamnuuco haysashada iyo cabista khamriga, weeynta, iyo calaqa gudaha beeraha raaxada iyo goobaha kale ee banaanka bulshada u dhaxeeya ee wakaaladu maamusho. Amarka ku meel gaar ah ayaa dhaqan galaaya Jamcada, Abril 24 ilaa Luuliyo 23, 2020. Waxaa loo sameeyay in lagu taageero laguna kobciyo amarada joogista guriga iyo kala fogaanshaha bulshada iyo xaqiijinta badqabka meelaha banaanka ee bulshada u dhaxeeya. Xanibaadaha kale, oo ay ku jiraan mamnuucida haysashada iyo ku cabista maadooyinka maanka dooriya ee khamrida jilicsan ama mida adag, ayaa wali ku jira xeerarka degmada ee khamriga lagu cabo beeraha raaxada iyo meelaha kale bulshada u dhaxeeya.

Waa muhiim in dadka jardiinada isticmaala ay fahmaan waxa mamnuuca ka ah beeraha raaxada ee Denver si looga hortago faafida COVID-19.

- Khamriga (oo ay ku jirto biirka, waynta iyo shaambeega) waa mamnuuc
- Haddii aad jiran tahay ha booqan beeraha raacada
- Ka fogaow ugu yaraan 6 fiid dadka kale markasta
- Ha iskugu imaanina ama ha u safrina koox-koox
- Ciyaaraha iyo nashaadadka koox-kooda loo sameeyo waa mamnuuc
- Adeegsiga wadaaga ah ee qalabka waa mamnuuc (tusaale, kubada lagdanka, kubadaha cagta, iwm.)
- Soo qaado daawadaada farxalka/alaabta aad wax ku farxalanayso
- Xir eeygaaga si aad uga hortagto inuu cudurka ku faafiyo dadka iyo eeyada kale.
- sAcadaha jardiinadu waa 5:00 subaxnimo. - 11:00 habaynimo

Denver waxay sii wadaysaa inay kormeerto ay xoog ku dhaqan galiso kala fogaanshaha bulshada beeraha raaxada dhexdooda. Haddii ay qasab tahay inaad beerta raaxada aado, fadlan booqo beerta kuugu dhaw. Saagashan boqolkiiba dadka dagan Denver waxay ku nool yihiin meel u jirta 10 daqigo oo lug ah beer raxo. Kahel beer kuu dhaw si aad ugu soo raaxaysato barta: <https://denvergov.org/maps/map/parks>. Haddii aad u baahan tahay awood fulin oo kala fogaanshaha bulshada ka dhaqan galisa beerta deegaankaaga, wac 311.

Denver waxay sii wadayaa inay xogo cusub ka bixiso isbadalada ku dhaca xeerarka beeraha raaxada si loo hubiyo in la raaco amarka kala fogaanshaha dadka. Xasuusnoow, si aad u joojiso faafida caabuqa COVID-19, joog guriga marka laga reebo inaad hawlo muhiim u baxayso oo raac dhammaan amarada caafimaadka dadwaynaha.

Inkastoo xarumaha raaxada ay hadda xiran yihiin, Denver Parks & Recreation ayaa bixinaysa ilo adeegyo dheeraad ah oo lagu daboolayo baahiyaha nasiinada ee dadka deegaanka. Barnaamijka dhawaan la bilaabay ee *Denver Parks and Recreation @ Home* ayaa bixinaaya barnaamijyo oonleen ah oo bilaash ah oo leh dookhyo kaladuwan lana siinaayo dhammaan dadka da'aha iyo awoodaha kaladuwan si ay u raaxaystaan.

Ayadoo qayb ka ah *Denver Parks and Recreation @ Home*, tababarayaal ayaa hagaaya dadka barnaamijka ka qaybgalaaya ayagoo tusaaya jimicsiyo iyo nashaadaadka ay firfircooni ku siiyaan maskaxdooda iyo jirkooda. Casharada jirdhiska, gaymam, mashruucyo farshaxan ah iyo waxyaabo kale ayaa laga helayaa baraha Denver Parks

& Recreation ee Facebook, Instagram iyo YouTube, ayna la socdaan casharada isdhexgalka oo lagu samaynaayo aalada Zoom. Jadwalka buuxa ee nashaadaad awaxaa laga heli karaa [oonleen ahaan](#) iyo Aalada Denver Parks and Recreation (IOS kaliya).

###